HM Government

Grenfell community updates

# Grenfell Tower community update: January 2026 - Somali / Af-Soomaali

**Xogta Cusub ee Grenfell Tower- Janaayo 2026**

Waxaan aqoonsannahay in Grenfell Tower uu muhiimad gaar ah oo qoto dheer u leeyahay dadka ay sida aadka ah u saamaysay masiibada , iyo in dhulku uu yahay mid xasuus gaar ah ugu fadhiya qoysaska. Waxaan dooneynaa inaan idinla socodsiino shaqadeena si aan si taxaddar leh ugu dhumino Dhismaha.

Xogtaan cusub waxaad ku heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan:

- **Derbiga Xusuusta Grenfell**
- **Boorarka Wadnaha ee Grenfell**
- **Hoos u dhigista qalabka dhismaha**
- **Ibinta Dhismaha**
- **La socoshada xogta la xariirta busta, gariirka iyo qaylada**
- **Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud**
- **Sida naloola hadlo loona helo xog dheeraad ah**

Xogihii hore waxaad ka heli kartaa: www.gov.uk/grenfell-community-updates

## Derbiga Xusuusta Grenfell

Nalalka ka sarreeya derbiga xusuusta Grenfell ayaa la badelay horraantii bishaan sababo la xariira in kuwo badan oo kamid ah nalalkii hadda aysan shaqaynayn.

## Baanarada Wadnaha ee Grenfell

Waxaan u wareejinay boorarka wadnaha Grenfell qaybta hoose ee Dhismaha iyadoo shaqadu ay socoto. Boorarka hore ayaa meesha laga saaray horaantii bishaan, Boorarka hoose waxaa la saari doonaa qaybta dambe ee sanadkaan.

## Hoos u dhigista qalabka dhismaha

Qalabka dhismaha ee lagu rakibay Grenfell Tower xagaagii hore ayaa hoos loo dhigi doonaa inta lagu jiro nuska teeramka dugsiga ee Febaraayo, oo ayna cimiladu tahay mid habboon.

## Ibinta Dhismaha

Waxaan maqalnay inay muhiim tahay inay jirto xusuus muuqata iyadoo Dhismaha si taxadar leh loo duminaayo. Waxaan ku rakibnay nalal si tiirka layrka ugu iftiimo kor gaar ahaan kuwa geesaha Dhismaha. Waxaan shidnay bishii hore waxayna sii wadi doonaan inay kor u iftiimiyaan gees kasta oo Dhismaha kamid ah habeen kasta,

muddo aan ka horeyn 5ta galabnimo, ilaa 11ka habeebimo. Nalalka iftiiminaya boorarka wadnaha ee Grenfell waxay shidmi doonaan laga bilaabo maqribkii ilaa 11ka habeenimo habeen kasta.

### La socoshada xogta la xariirta busta, gariirka iyo qaylada

Dowladda waxaa ka go'an inay hubiso in dhammaan shaqooyinka ka socda goobta Grenfell Tower loo fuliyo nidaam heer sare ah. Ammaanka iyo Badqabka bulshada iyo dadka ka shaqeeya goobta ayaa weli ah ahmiyadeena koowaad. Waxaa goobta jooga kormeerayaal uruurinaya xogta tooska ah ee boorka, gariirka, iyo qaylada. Xogta ayaa la daabacaa bil kasta. Si aad u aragto wararkii ugu dambeeyay, fadlan guji linkiyada hoose:
Warbixinta La socoshada busta: 1 Diseembar 2025 ilaa 4 Janaayo 2026
Warbixinta la socoshada gariirka: 1 Diseembar 2025 ilaa 4 Janaayo 2026
Warbixinta la socoshada qaylada: 1 Diseembar 2025 ilaa 4 Janaayo 2026

Hay'ada Amniga Caafimaadka ee UK (UKHSA) waxay sii wadi doonaan inay qiimeeyaan oo ay la socdaan tayada hawada ee aagga ku xeeran Grenfell Tower inta ay shaqadu socoto. Waxay warbixinteena daabacdaa bil kasta. Waxaad halkaan ka arki kartaa warbixinta ugu dambeysay:
Kormeerka deegaanka kadib dabkii ka dhacay Grenfell Towerka - GOV.UK

### Warbixinta caafimaadka iyo badqabka guud

Taageerada shucuurta iyo badqabka ee jirka waxay sii wadaa inay diyaar u tahay qoysaska murugaysan, dadka masiibada ka badbaaday, iyo dadka degan aagga goobta u dhaw inta lagu jiro shaqada sida taxadarka leh loogu duminaayo Grenfell Tower.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, waxaad:

- Wici kartaa Adeegga Badqabka guud ee Grenfell ood ka wici karto 020 8637 6279 (8da subaxnimo ilaa 8da habbeenimo, maalin kasta)
- Wac Central and North West London NHS Foundation Trust's (CNWL) meesha keliya ee khadka la-talinta ee gelitaanka xaalad degdeg ah laga helo,
  0800 0234 650 (furan 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii)
- Iimaylka: grenfell.wellbeingservice@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk si aad u hesho xog dheeraad ah

Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan adeegyada la heli karo, booqo www.grenfell.nhs.uk

### Sida naloola hadlo ama aad wax badan u ogaanayso

Waxaan dooneynaa inaan macluumaadka ku wadaagno qaab adiga ku anfacaya. Waxaan sii wadi doonaa in xogaha joogtada ah iyo macluumaadka aan ku wadaagno: www.gov.uk/grenfell-community-updates

Fadlan iimayl noogu soo dir: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk kuna socda:

- U diyaar garoow inaad noola hadasho si shaqsi ah ama koox ahaan waqti, taariikh, iyo goob kugu habboon adoo nagula hadlaya.
- Na waydii su'aalo kasta oo aad qabto ama nala wadaag walaac kasta oo ku saabsan shaqada sida taxadarka leh loogu duminaayo Dhismaha.
- Ogoow kulammadeena joogtada ah ee aan la yeelano saraakiisha iyo maamulaha qandaraaslaheena oo aad kala hadli karto shaqada.
- Naga codso inaan si toos ah iimayl kuugu soo dirno wararka joogtada ah.
- Wadaag fikradahaaga ku saabsan sida aan kula xiriirno oo aan kuula macaamilno, haddii aad rabto. Waxaanu soo dhawaynaynaa aragtidaada.

Si aad u hesho xogihii u dambeeyay ee ku saabsan Grenfell Tower, iyo si aad iska qorto fariimaha iimaylka, fadlan booqo: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee koodhka QR-ka.

**Kooxda maamulaysa goobta Grenfell Tower, Wasaarada Guriyeynta, Bulshooyinka iyo Dawlada Hoose**